Helsinki

Sannad-dugsiyeedka 2027–2028

Ku soo dhowow dugsiga!

Buugyare loogu talagalay waalidka ardayga fasalka koowaad





Ka kooban

3 ..... Ku soo dhowow dugsiga!

4 ..... Taariikhyada muhiimka ah

6 ..... Sidan ayaa dugsiga layskaga diwaangaliyaa

7 ..... Dugsiga dhow waxaa laga helayaa deegaanka aad deggantahay

8 ..... Codsashada dugsi kale oo aan ahayn kan dhow

9 ..... Codsashada waxbarashada xoogga la saaray,
tan ku baxaysa afka ingiriiska iyo tan labada luqadood ah

10 ..... Doorashada luqadda

10 ..... Waxbashada afka hooyo

11 ..... Doorashada cadaka waxbarashada ee maadada afka hooyo iyo suugaanta

13 ..... Doorashada maaddada aragtida nolosha

14 ..... Arrimaha waxqabadka ah

Ku soo dhowow dugsiga!

Fasalka koowaad ayuu ilmahaagu billaabayaa deyrta soo socota. Wakhtigu waa mid muhiim, waxaana ardayda cusub si xiiso leh loogu sugayaa dugsiyada.

Waxaan carruurta oo dhan Helsinki ku siinnaa tub waxbarasho oo ammaan iyo xiiso leh. Waxbarashadau waa wadajir wax u samayn, tijaabin iyo hal-abuuris. Waxaa billowga tubta waxbarashada si gaar ah xoogga loo saaraa macluumaadka iyo aqoonta udub-dhexaadka ah iyo aqoonta bulshada iyo dareenka, kuwaas oo si wadajir ah aasaas xooggan ugu sameeyaa waxbarashada.

Ardayda oo dhan ayaa xaq u yeelanaya inay wax bartaan oo ay taageero u helaan tubta waxbarashada inta ay ku jiraan oo dhan. Waxaa caawimaadda la siinayaa inta lagu jiro marxaladda hore iyadoo la sii saadaalinayo. Ammaanku wuxuu ka dhashaa, in dadka waaweyn ee ay ilmaha daneeyaan islamarkaana dhegeystaan isaga ilmuhuna uu shaqada dugsiga u dareemo mid caadi ah oo nololmaalmeedka qayb ka ah. Wadashaqeynta guriga iyo dugsiga ayaa arrimahan ka muuqanaya. Waxaan qoysaska la barbaarinaynaa reer Helsinki nololwanaagsan oo waxbarta.

Waxaa dhammaan carruurta dugsiyada billaabaysa iyo waalidiintooda u rajaynaynaa sannad-dugsiyeedka 2027–2028 oo wanaagsan!

Ville Raatikainen, Agaasimaha waxbarashada aasaasiga ah iyo waaxda barbaarinta iyo waxbarashada Magaalada Helsinki

Ku socotaha akhristaha

Waxaad buug-yarahan ah ka heleysaa macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan billaabista dugsiga. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heleysaa cinwaanka edu.hel.fi/tervetuloakouluun. Waxaad dhammaan arrimaha waxqabadka ah ka heleysaa macluumaadka dheeraadka ah ee dugsiga dhow ee ilmahaaga iyo bogaggiisa internetka edu.hel.fi/kouluhaku.

Buug-yarahan waxaa sidoo kale lagu daabacay afafka iswiidhishka, ingiriisiga, carabiga, soomaaliga iyo ruushka. Waxaad ka heli kartaa cinwaanka hel.fi/tervetuloakouluun.

Taariikhyada muhiimka ah

laga bilaabo 16.11.2026
Dugsiyadu waxay qabanqaabin karaan war-saxaafadeedyo. Ka hubi wakhtiyadooda bogagga internetka ee dugsiga: edu.hel.fi/kouluhaku.

Waxaan laga billaabo 7.1.2027 boostada ugu soo diraynaa cinwaanka guriga ilmaha wargelinta waajibka waxbarashada, taas oo lagu sheegayaa billaabashada waajibka waxbarashada ilmaha.

11.–24.1.2027
Iska diwaangelinta elegtrooniga ah ee dugsiga waxaa laga helayaa cinwaanka kouluun.hel.fi. Waxaad ilmahaaga ka diiwaangelin kartaa dugsiga dhow iyo dugsiyada kale, sida kuwa waxbaristooda la xoojiyay iyo waxbarista labada luqadood ku baxda. Haddii aad ilmahaaga ka diwaangelin waydo waxbarista ay magaaladu qabanqaabinayso ku soo sheeg arrintaas hel.fi/kouluhaku.

20.1.2027
Caawimaad ayaad u heli kartaa isdiiwaangelinta haddii aad tagto dugsiga kuu dhow Arbacada **20.1.2027, saacadda 8–10**. U sii qaado ogaysiiska waajibaadka waxbarashada ee ilmahaaga. Haddii aad ilmahaaga hore uga diiwaangelisay internetka, uma baahnid inaad dugsiga tagto.

24.1.2027
Haddii ilmahaaga aad u codsanayso boos ku yaalla cinwaan kale ama luqadda hooyo aanan lagu dhigin, waa in codsigaas ay aqbalaan dhammaan mas'uulada oo dhan. Oggolaanshaha waa in la bixiyaa ugu dambeyn 24.1.2027.

5.3.2027
Go'aanka lagu sheegayo in ardeyda la qaatay waxaa waalidka loogu dirayaa boosto ahaan 5.3.

15.3.–13.4.2027
Muddada codsiga ee waxqabadka naadiga galabtii. Macluumaad dheeraad ah hel.fi/iltapaivatoiminta.

21.3.2027
Macluumaadka dheeraadka ah ee khuseeya qabanqaabada waxbarashada ee lagu bixin karo qaab elegtroonig ah wuu dhamaanayaa.

Guga 2027
Dugsiyadu waxaay u qabanqaabinayaan ardeyda bilaabaya fasalka koowaad munaasabado barasho ah. Macluumaadka dheeraadka ah ee bogagga internetka ee dugsiyada hel.fi/kouluhaku

11.8.2027
Carruurta bilaabaysa fasalka koowaad waxay dugsiga bilaabi doonaan arbacada 11.8.2027

Macluumaad dheeraad ah:
hel.fi/tervetuloakouluun
hel.fi/kouluhaku



Sidan ayaa dugsiga layskaga diwaangaliyaa

- Diiwaangelinta dugsiga waxaa lagu sameeyaa internetka.

- Ilmahaaga dugsiga kaga diiwaangeli cinwaanka kouluun.hel.fi inta u dhexaysa **11.–24.1.2027**. Bogga internetka waxaa la isticmaali karaa ugu dambayn laga bilaabo **11.1.2027**

Caawimaad ayaad u heli kartaa isdiiwaangelinta haddii aad tagto dugsiga kuu dhow arbacada **20.1.2027, saacadda 8.00–10.00**. U sii qaado ogaysiiska waajibaadka waxbarashada ee ilmahaaga.

Adeegga internetka waxaad ilmahaaga kaga diiwaangelin kartaa dugsiga deegaanka ama waxaad ugu codsan kartaa dugsiyada kale ee magaalada Helsinki iyo noocyada waxbarashada ee ay bixiyaan.

Haddii aadan doonayn inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso waxbarashada ay magaalada Helsinki qabanqaabiso, balse uu tusaale ahaan aadayo dugsi gaar loo leeyahay ama uu guriga wax ku baranayo, waa inaad arrintaas ku wargelisaa magaalada adigoo isticmaalaya cinwaanka kouluun.hel.fi. Xogtaas waa muhiim in la sheego sababta oo ah magaalada ayaa kormeeraysa in la hirgaliyo waajibka waxbarashada.



Dugsiga dhow waxaa laga helayaa deegaanka aad deggantahay

Ilmo kasta iyo da'yar kasta oo ku nool Helsinki wuxuu xaq u leeyahay boos dugsi oo ku yaalla dugsiga waxbarashada aasaasiga ah ee deegaanka uu deggan yahay. Dugsigaas waxaa loo yaqaannaa dugsiga deegaanka. Helsinki waxaa loo qaybiyay soonayaasha arday qaadashada, kuwaas oo uu ka soo baxayo dugsiga dhow. Badanaa dugsiga deegaanka waxaa lagu tagi karaa lug, laakiin mar kasta ma aha dugsiga ardey kasta gurigiisa ugu dhow. Tusaale ahaan, dugsiga arday dhigta fasal gaar ah wuxuu ku oolli karaa meel xoogaa ka fog gurigiisa.

Magaalada ayaa ilmaha u qoondeynaysa dugsiga deegaanka iyadoo ku salaynaysa cinwaanka guriga ee ilmaha uga diiwaangashan nidaamka diiwaanka dadweynaha iyo afkiisa hooyo. Haddii afka hooyo ee ilmahaagu aanu ahayn Iswiidhish, waxaa boos laga siinayaa dugsiga deegaanka ee waxbarashadiisu ku baxdo afka Finnishka.

Dugsiga deegaanka ee ilmahaaga waxaad ka arki kartaa wargelinta waajibka waxbarashada ee laguu soo diro ee boostada loogu soo dirayo cinwaanka guriga ilmaha bilowga bisha Janaayo 2027.



Codsashada dugsi kale oo aan ahayn kan dhow

Ilmaha waxaa sidoo kale boos looga codsan karaa dugsi aan ahayn dugsiga deegaanka. Dugsi kale ayaa tusaale ahaan la codsadaa marka la doonayo in ilmuhu helo waxbarashada la xoojiyay, waxbarashada labada luqadood ama waxbarashada afka Ingiriisiga.

Waxaad ilmahaaga sidoo kale boos uga codsan kartaa fasal caadi ah oo ku yaalla dugsi kale. Dugsiyada deegaanka waxay mar kasta mudnaanta koowaad siiyaan ardayda ku nool deegaankooda. Ardayda kale waa la qaadan karaa haddii boosas bannaan ay jiraan.

Haddii aad doonayso inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso dugsi aan ahayn dugsiga deegaanka, dhammaan mas'uuliyiinta sharciga ah ee ilmaha waa inay bixiyaan oggolaanshahooda. Oggolaanshaha waa in lagu bixiyaa cinwaanka kouluun.hel.fi ugu dambayn 24.1.2027. Haddii aadan oggolaanshaha ku bixin karin internetka, la xiriir dugsiga aad doonayso inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso.



Codsashada waxbarashada xoogga la saaray, tan ku baxaysa afka ingiriiska iyo tan labada luqadood ah

Dugsiyada waxbarashadoodu ku baxdo afka Finnishka waxaa laga codsan karaa waxbarashada la xoojiyay, waxbarashada labada luqadood ama waxbarashada afka Ingiriisiga.

Waxbarashada la xoojiyay ee muusiga

Helsinki, waxbarashada muusigga ee la xoojiyay ee fasalka 1-aad waxaa laga bixiyaa dugsiga Porolahden peruskoulu ee ku yaalla Roihuvuori. Imtixaanka doorashada ayaa lagu codsadaa waxbarashada la xoojiyay. Taariikhaha iyo macluumaadka dheeraadka ah ee imtixaanka xulashada waxaad ka helaysaa bogga internetka ee dugsiga.

Waxbarasho labo luqadeed ah

Ardayda dhigata waxbarashada labada luqadood waxay wax ku bartaan afka Finnishka iyo luqad kale. Waxaa Helsinki lagu bixiyanaa waxbarashada labada luqadood ku baxda oo kala ah finnish-isbanish-, finnish-shiinees-, finnish-saame woqooyi-, finnish-iswiidhish-, finnish-ruush- iyo finnish-istooniya. Macluumaadka ku saabsan dugsiyada bixiya waxbarashada labada luqadood waxaad ka helaysaa bogagga internetka ee magaalada iyo dugsiyada. Macluumaadka ku saabsan dugsiyada bixiya waxbarashada ku baxda labada luqadood waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee magaalada iyo dugsiyada.

Waxbarashada ku baxaysa afka ingiriiska

Waxbarashada afka ingiriisiga, dhammaan maadooyinka waxaa lagu dhigaa afka Ingiriisiga, marka laga reebo maadada afka Finnishka iyo suugaanta. Waxbarashada afka ingiriisiga waxaa ugu horrayn loogu talagalay carruurta qoysaskoodu si ku meelgaar ah u deggan yihiin Helsinki. Codsaduhu wuxuu ka qaybgalayaa imtixaan xulasho ah oo lagu qiimaynayo aqoonta ilmaha ee afka Ingiriisiga.

Doorashada luqadda

Fasalka koowaad ayuu ilmuhu bilaabayaa barashada luqaddiisa qalaad ee ugu horreysa. Luqaddan waxaa loo yaqaannaa luqadda A1. Ilmaba ilmuhuu ka yaryahay ayaay uga fududdahay inuu luqad cusub barto. Waxaa luqad koowaad ahaan Helsinki looga baran karaa luqadaha kala ah ingiriis, isbaanish, shiinees, faransiis, iswiidhish, jarmal ama ruush. Haddiin liiska luqadaha ee dugsiga u dhow ilmahaaga aanay ku jirin luqadda uu ilmuhu rabi lahaa in uu barto, waxaa boos uga codsan kartaa isaga dugsi kale. Ku soo wargeli dugsiga luqadaha A1 ee uu ilmahaagu rajaynayo islamarka aad diiwaangelinta samaynayso. Liiska luqadaha ee dugsiga waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee dugsiga iyo cinwaanka hel.fi/kouluhaku.

Luqadda A1 ee dugsiga ku baxa luqadda iswiidhishku waxay dadka oo dhan u tahay luqadda finnishka. Waa in la doortaa heerka luqadda finnishka marka diiwaangelinta la samaynayo.

Fiidka warbixinta luqadeed ee waalidka ardayda dugsiga billaabaysa ee magaalada oo dhan waa 11.11.2026, saacadda 17.00-18.30
Sidee loogu doorayaa luqadda qalaad ee koowaad (luqadda A1) ardayga fasalka koowaad? Waa maxay waxbarashada afka finnishka oo sidii luqad labaad ah, waxbarashada afka hooyo ama waxbarashada labada luqadeed ah? Ku soo dhowow kulanka waalidiinta ee magaalada oo dhan, kaas oo aad ka heli doonto macluumaad ku saabsan luqadaha laga barto waxbarashada aasaasiga ah ee afka Finnishka ku baxda ee Helsinki iyo waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo marka luqadda la dooranayo. Khadka internetka ayaa kulanka lagu qabanqaabinayaa. Macluumaadka dheeraad ah iyo isdiiwaangelinta waxaa laga helaa hel.fi/tervetuloakouluun.

Waxbashada afka hooyo

Haddii afka hooyo ama afka guriga lagaga hadlo ee ilmahaagu ka duwan yahay luqadda waxbarashada, waxaa suurtagal ah inuu sidoo kale helo waxbarasho ku baxda luqaddaas. Ka qaybqaadashada waxbarashadu waa ikhtiyaari, khasabna ma aha. Waxbarashada waxaa badanaa la qabanqaabiyaa marka maalin-dugsiyeedku dhammaado. Waxaa dhici karta in ilmuhu u baahdo inuu dugsi kale u tago xiisadaha afka hooyo.

Doorashada cadaka wax-barashada ee maadada afka hooyo iyo suugaanta

Marka ilmaha dugsiga laga diiwaangelinayo, mas'uulka sharciga ah ee ilmaha ayaa dooranaya inuu ilmuhu barto afka Finnishka heerka afka hooyo (S1) ama inuu u barto luqad labaad ahaan (S2). Manhajka S1 waxaa loogu talagalay carruurta afka Finnishka u yaqaanna heerka afka hooyo, iyada oo aan loo eegin afkooda hooyo. Doorashadani ma aha mid kama dambays ah. Waxaad arrintan kala hadli kartaa macallinka ilmahaaga marka dugsigu bilaabmo. Ujeeddadu waa in ardayda waxbarashada ku bilaaba kooxda S2 ay bartaan afka Finnishka oo ay mustaqbalka awoodaan inay u gudbaan waxbarashada afka Finnishka ee heerka afka hooyo.





Doorashada maaddada aragtida nolosha

Carruurtu waxay dugsiga ka qaybqaataan xiisadaha maadada diinta ama maadada aragtida nolosha.

Waxaa jira xiisado diimeed oo loogu talagalay diimaha kala duwan. Helsinki waxaa hadda suurtagal ah in la barto maadooyinka soo socda:

- Diinta Kiristaanka ee injiilka Luteranka ah
- Cilmiga aragtida macnaha nolosha
- Katooliga
- Orthodhokska
- Islaamka
- Buudhistaha (waxbarashaa af finnishka oo kaliya)
- Krishnaha (waxbarashaa af finnishka oo kaliya)

Mas'uulka ilmaha ka tirsan kaniisadda injiilka Luteranka ah ma dooran karo maado diimeed kale. Haddii ilmahaagu aanu ka tirsanayn kaniisad ama uu ka tirsan yahay koox diimeed kale, mas'uulka sharciga ah ee ilmaha waa inuu doortaa xiisadaha uu ilmuhu ka qaybgalayo. Noocyada maadooyinka la dooran karo waxay ku xiran yihiin diinta ama kooxda diimeed ee ilmuhu ka tirsan yahay.



Arrimaha waxqabadka ah

Shaqada dugsiga iyo wakhtiyada fasaxa

Dhigashada dugsigu waa shaqada ardayga. Jadwalka xiisadaha ayaa qaabeynaya siinaya todobaadka dugsiga. Waxaa halkaas ku qoran wakhtiyada billaabashada iyo dhamaanshaha xiisadaha iyo saacadaha biririfta iyo bareegga qadada. Xuusadaha waxbarashada ee maaddooyinku waa kuwa maalin kasta isbeddela. Waa in fasaxyada qoyska lagu beegaa wakhtiyada fasaxa ee dugsiga, sababtoo ah maqnaanshiyuhu waxay yaraynaysaa waxbarashada uu ardaygu helayo. Mas'uliiyinta ilmaha ayaa sababo gaar ah ugu codsan kara ilmaha in laga fasaxo dugsi-dhigashada. Markaasna, waalidiintu waa in ay ku dadaalaan, in ilmuhu sameeyo casharada la siiyay maqnaanshiyuhuna aanay dhibaato ku noqon dugsi-dhigashada.

Aagabka dugsiga iyo qalabyada

Ardaygu wuxuu agabka dugsiga iyo qalabka uu u baahanyahay ka helayaa dugsiga. Qoysku wuxuu u baahanyahay in uu ilmaha u soo iibiyo boorashada dugsiga iyo boorsada qalmaanta ee loogu talagalay agabka dugsiga. Waxaa intaas dheer, in ay tahay in uu ilmuhu haysto dhar iyo qalab jimicsiga gudaha iyo bannaanka ku habboon cilmada markaas jirtana ku habboon.

Cuntada dugsiga

Ardaydu waxay maalin-dugsiyeed kasta helayaa cunto lacag la'aan ah. Waa in maalin kasta la kala doortaa labo raashinka weyn ah. Cuntada waxaa ku jriay raashin diirran, ansalaato, cunto hooan ama cad gareesh ah, cabitaanka cuntada, rooti iyo subag rootiga la marsado.

Barashada dabbaasha ee dugsiga

Waxbarashada dabbaashu waa qayb ka mid ah waxbarashada jimicsiga. Ardaygu waa in uu haystaa dharka dabbaasha iyo shukumaan. Dugsiga ayaa bixinaya hagitaanka rasmiga ah ee qalabka iyo sida loogu dhaqmayo hoolka dabaasha. Barashada aqoonta dabbaashu waxay u baahantahay wakhti iyo tababar joogto ah. Waxaa horumarka aqoonta muhiim u ah, in dadka waaweyn ay ilmaha dabbaasha geeyaan wakhtiga firaaqada.

Munaasabadaha diiniga ah

Dugsiga ayaa mas'uuliyiinta caruurta ku wargelinaya billowga sannad-dugsiyeedka munaasabadaha diimeed ee dugsiga lagu qabanqaabinayo. Mas'uulka ilmaha ayaa go'aaminaya, in ilmuhu ka qaybgelayo munaasabadaas

iyo in kale. Waxaa markasta la bixinayaa waxqabad beddelaya munaasabadaha diinta.

Caymisyada

Magaalada Helsinki ayaa ardayda oo dhan gelisay caymiska shilalka. Caymisyadu ma quseeyaan hantida gaarka ah ee ardaydu leeyihiin. Caymisku wuxuu shaqaynayaa inta la joogo dugsiga iyo inta lagu jiro safarrada dufsuga iyo munaasabadaha uu dugsigu qabanqaabiyo, booqashooyinkooda waxbarashada iyo xero-dugsiyeedka.

Isticmaalidda qalabka mobaylka

Isticmaalka qalabka mobaylka ee dugsiga dhexdiisa waxaa laga sameeyay sharciyo dadka ka wada dhexeeya oo ku qoran sharciyada nidaameed dugsiga Ardeyda dugsiyada hoose-dhexe uma bannaana inay isticmaalaan taleefan, tableed, dhagaha wax lagu dhageysto, taleefanka saacadda ah ama saacadaha internetka ku shaqeeya wakhtiyada lagu jiro xiisadaha dugsiga marka laga saaro marka waxbarasho loo isticmaalayo ee macallimiintu ay fasax gaar ah u siiyaan ardeyda. Taleefanka gacanta waxaa si kastaba bannaan in macallinka ama maamuluhu uu oggolaado in loo isticmaalo in waxbarashada lagu taageero ama sababo caafimaadka la xidhiidha dartood. Waxaa sidoo kale isticmaalidda telefoonnada gacanta la hagayaa laga bixinayaa tilmaansiinta ku saabsan xiisadaha birirfta, wakhtiyada kala wareeegga iyo wakhtiga cunto-cunista.

Waxqabadka gelinka hore

Waxaan waxqabadka subaxdi ee waxbarashada aasaasiga ah ku qabanqaabinnaada dugsiyada kahor xiisadaha ardayda fasallada 1aad iyo 2aad iyo ardayada fasallada 3aad iyo 4aad, kuwaas oo heysta go'aan maamul oo quseeya caawimaadda waxbarashada. Waxqabadku waa mid aan qasab aheyn oo lacag la'aan ah. Waa suuragal in billaabashada dugsiga kaddib la iska diiwaangeliyo iyadoo la isticmaalayo aqoonsiyada Wilmada. Macluumaadk dheeraad ah hel.fi/aamupaivatoiminta.

Waxqabadka galabti

Waxaa maalin-dugsiyeedka kaddib Helsinki loogu qabanqaabiyaa ardyada fasallada 1aad iyo 2aad waxqabadka galabti, kuwaas oo heysta go'aan maamul oo quseeya caawimaadda waxbarashada. Waxqabadka galabti waa lagu ciyaaraa saaxiibadana wakhtiga ayaa lagula qaataa, bannaanka ayaa socod loo aadaa waana la jimicsadaa dalxiisyo gaagaabanna waxaa lagu sameeyaa bey'adaha u dhow. Waxqabadka galabtii waa mid lacag laga bixiyo waxaana lagu helaa casariye iyo caymis. Wakhtiga codsiga waxqabadka galabti waa 15.3.–13.4.2027. Macluumaad dheeraad ah hel.fi/iltapaivatoiminta.

Helsinki

La xiriir
Talobixinta barbaarinta iyo waxbarashada
tel. 09 310 44986 maalmaha shaqada, saacadda 10–12 iyo 13–15,
iimayl koulutusneuvonta@hel.fi

cinwaanka booqashada: Työpajankatu 8, 00580 Helsinki
cinwaanka boostada: SB 51300, 00099 Magaalada Helsinki
telefoonka dhexe: 09 310 8600 maalmaha shaqada saacadda 8.15–16

hel.fi/tervetuloakouluun

Nagala soco:

- #HelsinkiOppii
- @HelsinkiOppii
- Helsingin kasvatus ja koulutus
- Kasvatuksen ja koulutuksen toimiala

hel.fi/welcometoschool

Waxaa soo saaraya Waaxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada ee magaalada Helsinki
Sawirada Laura Oja. Qofka sawiray: Lille Santanen
Goobta lagu daabacay Grano Oy, 10/2026.
Macluumaadka warbixinta waxaa la saxay Oktoobar 2026. Waxaan reebanaynaa xuquuqda wax ka beddelista.
Macluumaadka wakhtiga la socda hel.fi/tervetuloakouluun iyo bogagga internetka ee dugsiyada hel.fi/kouluhaku.